



## Sawir muujinaya Tirooyin ka socda Dhacdooyinka Tallaalka PPS ee Ardayda da'doodu tahay 5-11

Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay sii wadaan inay ku ololeeyaan in dhammaan ardayda iyo shaqaalaha mutaystay laga tallaalo COVID-19. Si aanu gacan uga gaysano dardar-gelinta dadaalka tallaalka ardayda yaryar kadib markii tallaalka loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 5 ilaa 11 loo ansixiyey taariikhdu markay ahayd Noofambar 2, waxaanu dhawr dugsi ku qabanay dhacdooyin si aanu ardayda aan caddaanka ahayn fursad ugu siino in la tallaalo.

Xogta la hayo ee lix ka mid ah dhacdooyinkan oo la qabtay laga bilaabo Noofambar 10 ilaa 19 laguna qabtay Rigler, Sitton, Boise-Eliot/Humboldt, Lent, Scott iyo Faubion, waxay muujinayaan sawir ah in bulshadu si xooggan uga falcelisay. Goobahaas, oo tallaalka la siinayey ardayda dugsiyadaas iyo qoysaskooda, waxaanu awood u yeelanay inaanu bixino 687 tallaalka. Dadka tallaalkan qaatay, 514 ka mid ah waxay ahaayeen qaar aan tallaalnayn, taasi oo sare u sii qaadi doonta difaaca dugsiyada iyo bulshada ee cudurka.

Dhacdooyinka oo lala kaashaday Kaiser Permanente iyo Medical Teams International, waxa loo qabtay si loo gaaro ardayda iyo qoysaska aan caddaanka ahayn iyo sidoo kale ardayda dhawaanta mutaystay ee da'doodu tahay 5 ilaa 11. Qaar ka mid ah tirooyinka muujinaya sida dadaaladani u meelmareen:

Qaybta	Tirada la Tallaalay	Xusuusqorrada
Wadarta	687	Wadaraaha Rigler, Sitton, Boise-Eliot/Humboldt, Lent, Scott, Faubion
Ardayda da'doodu tahay 5-11	501	Qaatay qiyaasta loogu talagalay carruurta yaryar tallaalka Pfizer
Ardayda, qoysaska 18 iyo ka badan	181	
Hore aan u tallaalayn	514	Qaatay qaybta koowaad ee tallaalka
Qaatay qaybta xoojinta	171	Kuwa hore si buuxda ugu tallaalnaa
Hisbaanig	108	Ardayda Hisbaanigu waxay ka yihiin 16% wadarta ardayda dhigata PPS
Madaw/Afrikaan Maraykan	69	Ardayda Madaw/Afrikaan Maraykanku waxay ka yihiin 10% wadarta ardayda dhigata PPS